

JAMHUURIYADA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADA



XEERKA KALA XADAYNTA GANACSIGA

(XEER Lr. 26/2004)

49/2
REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-0096/022004

DATE 09/02/04

DECREETO MADAXWEYNE NO: 013/022004

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu helay: Go'aankii GW ee Lr: GW/KF-21/316/2004 ee 12/01/2004 uu Golaha Wakiiladu ku ansixiyay Xeerka kala Xadaynta Ganacsiga Xeer No: 26/2004 iyo Go'aanka ansixinta Golaha Guurtida Lr: GG/Kal-fahdi-23/G-3/2004 ee 24/01/2004.

Markuu arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Wuxuu Soo saarayaa

Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka Xeerka kala Xadaynta Ganacsiga Xeer No: 26/2004.

Waxaana lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee dawladda.

Allaa Mahad Leh

Daahir Rayaale Kaahin
Madaxweyne



20



Our ref: GWIKF-21/316 /2004

12/01/04

GO'AAN ANSIXIN XEERKA KALA XADAYNTA GANACSIGA
(Xeer No. 26/2004)

GOLAHA WAKIILADA JSL

- Markuu Arkay:** Qodobka 11 (2)aad ee Dastuurka oo si cad u qeexaya-"in aanu habka dhaqaale noqonin mid horseeda in barwaaqadu ku koobnaato ama ku ururto koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan wax haysan."
- Markuu dareemay:** baahida loo qabo xeer suura galiya mabaadiida Dastuurku u jideeyay xaqiijinta xuquuqda cadaalad qaybsiga bulshada ee dhinacyada adeegyada iyo fursadaha dhaqaalaha.
- Markuu dhagaystay:** Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyo Wershadaha oo u xil saaran abuuritaanka himilooyinka horumarinta dhaqaale iyo furfuridda irridaha Ganacsiga wax iswaydaarsiga ee dalkan J/Somaliland.
- Markuu u Codeeyay:** ansixinta Xeerka Kala Xadaynta Ganacsiga, fadhigii 12/01/2004, oo ay goob-joog ahaayeen 51 Xubnood oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada

Wuxuu

Cod aqlabiyad ah (40 cod) oo qacan taq ah ku ansixiyey Xeerka Kala Xadaynta Ganacsiga (Xeer No. 26/2004). Halka 1 Mudane ka diiday, 9 Mudane oo kalena ka aamuseen, Gudoomiyuhuna aanu codayn sida u caadada ahayd.

Allah Mahad Leh,


Maxamed Xuseen Cisman
Xoghayaha Guud, G/Wakiilada




Axmed Maxamed Adan
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada

XEERKA KA LA XADAYNTA GANACSIGA

(Xeer No. 26 2004)

Markuu arkay:- Qodobka 11 (2)aad ee Dastuurka oo si cad u qeexay “ in aanu habka dhaqaale noqonin mid hor seeda in barwaaqadu ku koobnaato ama kaku ururt koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta iyo kuwo aan wax haynin.

Markuu dareemay: baahida loo qabo xeer guura galiya mabadida Distoorku u jeediyay xaqiijinta xuquuqd cadaalad qaybsiga bulshada ee dhinacyada adeegyada

Markuu dareemay: soo jeedinta wasiirka Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha oo u xilsaaran abuuritaanka himilooyinka horumarinta dhaqaale iyo fur-furidda iridaha Ganacsiga wax iswaydaarsiga ee dalka Jamhuuriyada Somaliland

WUXUU ANSIXIYAY XEERKAN

QODOBKA 1^{AAD}

- b) Ganacsiga wax soo dejinta iyo wax dhoofinta (importer and exporter Trader)
- t) Ganacsiga wax soo dejinta (importer Trader).
- j) Ganacsiga wax dhoofiya (Exporter Trader)
- x) Ganacsiga Julmadlaha ah (wholeseller Trader).
- kh. Ganacsiga Tafaariqa ah (Retailer Trader)

QODOBKA 2^{AAD}

Eray Bixin

- b) Ganacsiga wax soo dejinta iyo wax dhoofinta (importer and exporter Trader)**

Waxa loo la jeeda ganacsiga badeecad dhoofiya ee haysta liisanka

Wax soo dejinta iyo dhoofinta

t. Ganacsiga wax soo dejinta (importer Trader).

Waxa loola jeedaa Ganacsiga wax soo dejiya ee haysta liisanka soo

Dejinta Badeecada ama Alaabta.

j. Ganacsiga wax dhoofiya (Exporter Trader)

Waxa loola jeeda Ganacsadaha wax dhoofiya ee Liisanka haysta in uu

badeecad alaab dhoofiyo.

x. Ganacsiga Julmadlaha ah (wholeseller Trader).

Waxa loola jeedaa Ganacsadaha wax aka iibsada Ganacsadaha wax soo

dejiya (import Trader) ama Ganacsadaha wax soo dejiya waxna dhoofiya

(import and Export Trader)

Kh. Ganacsiga Tafaariqa ah (Retailer Trader)

Waa Ganacsadaha haysta shatiga Dawladda Hoose ee wax ka soo iibsada ganacsadaha Julmadlaha ah kuna sii iibiya tafaariiq.

QODOBKA 3^{AAD}

Ganacsiga Gudaha waxa uu noqonayaa nooc kasta oo ganacsi oo ku sugan Dalka gudihiisa ama xusduudaha Dalka.

QODOBKA 4^{AAD}

Ganacsiga Gudaha iyo Ganacsiga Jumladlaha ah waxa lagu kala iibsan karaa lacagta Dalka (legal-tender to all Public & Pribat Sector) Somaliland Shilling.

QODOBKA 5^{AAD}

Ganacsiga Julmadlaha (whole saler) waa ganacsiga u dhaxeeya wax soo Dejiyayaasha ama keenayaaasha Debadda iyo Jumladlayaasha.

QODOBKA 6^{AAD}

Ganacsadaha Jumladlaha alaabta uu keeno kuma iibin karo Taraafiiq ahaan sida Ganacsadaha Tafaariqlaha ah.

QODOBKA 7^{AAD}

Ganacsaduhu sanad kasta dhamaadkiisa waa inuu Wasaarada Maaliyada ka buuxiyaa Foomka koobida Hantidiisa bixinaya Macaashalmacaashka ku waajibay ee Wasaarada Maaliyada (Tax Clearance Certificate).

QODOBKA 8^{AAD}

Ganacsadaha Tafaariqlaha ahi ama Macdarlaha waa Ganacsadaha u dhaxeeya Ganacsiga Jumladlaha Macaamiisha.

QODOBKA 9^{AAD}

Ganacsadaha Julmadlaha wuxuu qaadanayaa Liisanka Ganacsiga Jumladaha, wuxuuna ka qaadanayaa Wasaaradda Ganacsiga Liisanka Darejada B.

QODOBKA 10^{AAD}

Ganacsiga soo dejiyaha (**import Trader**) ama wax dhoofiya (**Export Trader**) ama wax oo dejiyaha waxna dhoofiya (**Import & Export Trader**) waxa uu qaadanayaa Liisanka Ganacsiga ee Derajadda A oo ka qaadanayo Wasaaradda Ganacsiga iyo Wershaddaha.

QODOBKA 11^{AAD}

Ganacsadaha Tafaariqlaha ah ee xabada ama Kilo-garaamka iibinayaa wuxuu qaadanayaa Shatiga Dawladaha Hoose ee Ganasadaha Tafaariqlah ama Macdaarlaha.

QODOBKA 12^{AAD}

Qodobka 12^{aad}

Ganacsade ma wada qaadaan karo Liisanka Ganacsiga Julmadlaha Guud iyo Tafaariiqle.

QODOBKA 13^{AAD}

Ganacsadaha Xeerkan jabiya waxa loo marinayaa ciqaabta hoos ku qoran:

b) Marka hore waxa loo gudbinayaa Digniin qoraal ah.

t) Marka labaad waxaa la ganaaxayaa lacag dhan SL.SH, **10,000,000/=** ilaa **15,000,000/=**.

QODOBKA 14^{AAD}

Ganacsadaha jabiya Xeerkan laba jeer wixii ka dambeeya waxaa laga qaadayaa liisanka loogu ogolaaday markii hore inuu ku Ganacsado.

QODOBKA 15^{AAD}

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka Madaxweynuhu saxeexo, ansixinta Baarlamaanka dabadeed.

ALLAA MAHAD LEH

Maxamed Xuseen Cismaan

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada

Axmed Maxamed Aadan

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada